

Degista Ontario

Wax kasta oo ay tahay inaad ka ogaato u guurista iyo degista Ontario.

Boggan waxa ku yaala

1. [Open a bank account \(Furo xisaab bangi\)](#)
2. [Find housing \(Helitaanka guri\)](#)
3. [Learn English and French \(Baro Ingiriisida iyo Faransiiska\)](#)
4. [Find a job \(Shaqo hel\)](#)
5. [Enrol your children in school \(Qor carruurtaada dugsi\)](#)
6. [Find child care \(Hel daryeel ilme\)](#)
7. [Get health care \(Hel daryeel caafimaad\)](#)
8. [Get a driver's licence \(Hel shatiga kaxaynta baabuurka\)](#)
9. [Transportation \(Gaadiidka\)](#)
10. [Who to call during an emergency \(Cidda la wacayo muddada xaaladda gurmada\)](#)

Furo xisaabta bangi

Xisaabta bangi waxay kuu sahashaa inaad maarayso lacagtaada iyo oo aad ilaashato.

Waad furan kartaa xisaab bangi xiitaa haddii aanad lahayn cinwaan, haysan shaqo ama lacag aad dhigto xisaabtaada isla markaasi.

Si aad xisaab u furato:

1. keen **ugu yaraan laba qaybood oo ah [acceptable, original identification \(aqoonsiga asalka ah ee la aqbali karo\)](#) (bangnigu aqbali maayo koobiyada)**
2. dooro bangiga
3. bangiga toos u tag
4. u sheeg inaad rabto inaad xisaab cusub furato

marka xisaabta la furo, **waxaad codsataa jeeg buug**. Waxaad mar dambe ugu baahan kartaa inaad deebaaji guri dhigto ama kirada ku bixiso.

Wax badan ka ogow:

- [how to open a bank account \(sida loo furto xisaab bangi\)](#)
- [your rights and responsibilities when dealing with banks \(xuquuqdaada iyo masuuliyadahaaga marka aad la tacaamulayso bangiyada\)](#)

Hel guri

Waxaad dooran kartaa inaad kiraysato, iibasto ama hesho guri xaalad gurmada ah ilaa aad helayso meel aad si rasmi ah ugu noolaato.

Guriga xaaladda gurmada

Haddii aad u baahato caawimo helitaanka guri xaaladda gurmada, booqo midkood:

1. Settlement.org
2. the [Housing Help Association of Ontario \(Ururka Caawimada Guriga ee Ontario\)](#) onlayn, ama adigoo isticmaalaya:
 - o taleefanka: [905-526-8100](tel:905-526-8100)
 - o [email \(iimeylka\)](#)

Kiraysiga

Waxa jira meelo badan oo laga raadiyo guri Ontario, oo ay kujiraan:

- ka raadinta Internetka iyo qaybaha gaarka ah ee daabacaadaha guryaha kirada ah
- la-hadalka wakaalad hantida ma-guurtada ah
- eegista sabuuradaha wixii cusub ee tukaanada, maktabadaha, doobiilayaasha, rugaha caafimaadka, tukaanada huudhaydhka, xarumaha bulshada, naadiyada adeegga iyo xafiisyada hantida ma-guurtada ah
- la-hadlidda qaraabada ama dadka aad wada shaqaysaan

Haddii aad doorato inaad kiraysato, waa inaad:

1. buuxi foomka dalabka kirada una gudbi mulkiilaha
2. saxeeh heshiis kiro, kaasi oo ah heshiis sharci ah oo u dhexeeya adiga iyo mulkiilaha kaasi oo ay ku qoran yihiin kirada aad bixinayso iyo xuquuqdaada iyo masuuliyadahaaga
3. bixi deebaaji, kaasi oo sida badan ah jeeg ama lacag dalab, kaasi oo daboolaya kharashka kirada ee bisha koowaad iyo bisha u dambaysa
4. ku bixi kirada bishii wakhtigeeda (sida badan jeeg ahaan)

Wax badan ka ogow:

- [renting your first home in Canada \(ka kiraysiga hoygaaga koowaad Kanada\)](#) (PDF)
- [how much it costs to rent an apartment in Ontario \(Inta uu ku kacayo in abaarmen laga kiraysto Ontario\)](#)
- [your rights as a tenant in Ontario \(Xuquuqdaada kirayste ahaan Ontario\)](#)

Iibsashada

Kanada marka la joogo, guri-iibsashada waxa maamula [Canada Mortgage and Housing Corporation \(Shirkadda Daynta Guryaha iyo Guryaha Kanada\)](#).

Haddii aad doorato inaad guri iibsato, waa inaad **midkood**:

- bixisaa kharashka gurigu ku kacayo oo dhan, oo ay kujiraan khidmadaha iyo canshuuruhu
- dayn ka soo qaataa bangiga si aad ugu iibsato guriga **oo** lacag ku filan inaad ku dabooshana haysataa:
 - lacagta guriga laga sii dhigayo
 - dhammaan khidmadaha iyo canshuuraha

Wax badan ka ogow:

- [home-buying in Canada \(guri-iibsashada Kanada\)](#)
 - [what to know before buying a home in Ontario \(waxa la ogaanayo kahor intaan laga iibsan guri Ontario\)](#)
-

Baro Ingiriisida iyo Faransiis

Waxa jira barnaamijyo badan oo aad heli karto inay kaa caawiyaan [test or improve your English and French language skills \(imtixaanka iyo horumarinta xirfadahaaga luuqadaha Ingiriisida iyo Faransiis\)](#), kahor iyo kadib u soo guuristaada Ontario.

Shaqo hel

Waxa jira barnaamijyo badan oo dawladdu taageerto, xarumo bulsho iyo [settlement agencies \(hay'ado deegaamayneed\)](#) oo kaa caawinaya:

- helista shaqo
- horumarinta waraaqahaaga shaqada iyo xirfadahaaga waraysiga
- helitaanka waayo-aragnimada iyo xirfadaha Kanadiyaanka ee aad u baahan tahay si aad u guulaysato

Wax badan ka ogow [jobs and employment in Ontario \(shaqooyinka iyo shaqaalaynta Ontario\)](#).

Qor carruurtaada dugsi

Ontario marka la eego:

- **dhammaan carruurta u dhaxaysa 6-18 jir waa inay dugsi dhigtaan** (ha noqdo mid dawladu taageerto, gaar loo leeyahay ama dugsi-guri)
- carruurta intooda badan waxay ku dhigan karaan dugsiyada dawladdu taageerto lacag la'aan iyadoon loo eegin xaaladdooda socdaal ama xaaladda waalidiintooda (la xidhiidh [school board](#) (guddida dugsiya) deegaankaaga si aad u hesho macluumaad intan ka faahfaahsan)
- dugsiyada gaarka ah waxay ka qaadaan lacag dadka dhigta

Dugsiyada dawladda

Nidaamka waxbarashada dawladdu taageerto waxa loo kala qaadaa saddex marxaladood:

1. **Elementary school (Dugsiya hoose)**
 - doorashada waxbarasho Ingiriisi ah, Faransiis ah iyo/ama Kaatoli ah
 - sida caadiga ah ka bilaabma barbaarinta kuna dhammaada Fasalka 8aad
 - ardaydu waxay:
 - bartaan oo fahmaan aasaaska akhriska, qorista iyo xisaabta
2. **Secondary school (Dugsiya sare)**
 - doorashada waxbarasho Ingiriisi ah, Faransiis ah iyo/ama Kaatoli ah
 - sida caadiga ah ka bilaabma Fasalka 9aad kuna dhammaada Fasalka 12aad
 - ardaydu waxay:
 - diiradda saaraan waxyaalaha ay xiiseeyaan iskuna diyaariyaan qalinjabinta iyo wixii ka dambeeya
3. **Post-secondary school (Dugsiya sare kadib)**
 - loogu talagalay ardayda da' kasta ee kuuliyadda, jaamicadda iyo digiriiga koowaad kadib
 - waa waajib inaad **bixiso kharashka waxbarashada iyo buugaagta** laakiin waxaad [apply for grants and loans to help you pay for university or college \(dalban kartaa deeqaha iyo daymaha kaa caawinaya iska bixinta kharashka jaamicadda ama kuuliyadda\)](#) adigoo u maraya Barnaamijka Kaalamda Ardayga Ontario (OSAP)

Wax badan ka ogow:

- [how to enrol your child in school \(sida loo qoro ilmahaaga dugsi\)](#)
- [find elementary and secondary schools in your community \(ka hel dugsiyo hoose iyo sare bulshadaada\)](#)
- [full-day kindergarten for children aged 4 and 5 \(barbaarin maalinta oo dhan ah oo loogu talagalay carruurta 4 iyo 5 jirka ah\)](#)
- [key dates in the school year, including holidays \(taariikhaha muhiimka ah sannad dugsiyeedka \(ee dugsiyada hoose iyo sare\)](#)
- [going to college or university in Ontario \(dhigashada kuuliyad ama jaamicad Ontario\)](#)

Dugsiyada gaarka ah

Dawladda ma bixiso lacagta waxbarashada dugsiyada gaarka ah. Waa inaad adigu lacagta iska bixisaa adigu.

Wax badan ka ogow:

- [elementary and secondary schools \(dugsiyada hoose iyo sare ee gaarka ah\)](#)
- [post-secondary schools \(dugsiga sare wixii ka dambeeya ee gaarka ah\)](#)
- [career colleges \(kuuliyadaha xirfadah ee gaarka ah\)](#)

kuuliyadaha xirfadaha qaarkood waxa loo oggol yahay (caawimo iska bixinta lacagta waxbarashada). [Find out if your school is approved \(Soo ogow in dugsigaaga loo oggol yahay\)](#).

Hel daryeel ilme

Ontario marka la eego, waxa jira 2 nooc oo daryeelka ilmaha ah oo aad heli karto:

1. Shati haysta – dawladdu maamusho
2. Shati aan haysan – aanay dawladdu maamulin

Waxa jiri kara liis sugitaan meelaha ka bannaan daryeelka ilmaha ee shatiga haysta, markaa hore u bilaw inaad raadiso.

[Find licensed childcare in your community \(ka hel daryeel ilme oo shati haysta bulshadaada\)](#)

Wax badan ka ogow:

- [how to choose quality child care and questions to ask your child care provider \(sida loo doorto daryeel ilme oo tayo leh iyo su'aalaha la waydiiyo bixiyaha daryeelka ilmahaaga\)](#)
- [all of the types of child care available to you \(dhammaan noocyada daryeelka ilmaha ee aad heli karto\)](#)
- [child care resources from Settlement.org \(khayraadka daryeelka ilmaha ee Settlement.org\)](#)

Hel daryeel caafimaad

Haddii tahay tahay xaalad gurmada ah oo aanad lahayn kaadhka OHIP, **ka wac 911** taleefankaaga ama **booqo cusbitaalka kuugu dhaw.**

OHIP (Ontario Health Insurance Plan) waa qorshaha daryeelka caafimaadka Ontario. Isagoo sii maraya OHIP, gobolku wuxuu bixiyaa qaar badan oo kamid ah adeegyada daryeelka caafimaadka ee laga yaabo inaad u baahan tahay.

Waxaad u baahan tahay inaad dalbato kaadhka caafimaadka Ontario kaasi oo caddaynaya inay ku daboosho OHIP. Waa inaad tusto kaadhkaaga caafimaadka wakhti kasta oo aad la kulmayso dhakhtarkaaga, booqanayso qolka xaaladda gurmada, aad marayso tijaabo caafimaad ama qalliin galayso.

Guud ahaan, waxa jira wakhti sugitaan oo saddex bilood ah daboolka Qorshaha Caymiska Caafimaadka Ontario (OHIP). Hubi inaad leedahay caymis gaar ah oo aad ku daboolayso baahiyahaga daryeelka caafimaadka muddada wakhtigan sugitaanka.

Dadka la dhawray (Heshiisyada qaxootiga iyo dadka kale ee u baahan dhawris) waa laga dhaafay wakhtigan sugitaanka ee saddexda bilood ah.

Si aad u dalbato:

1. hel foomka dalabka:
 - o [online \(onlayn\)](#)
 - o ama [your local Service Ontario OHIP Office \(Xafiiska OHIP Ontario ee adeegga ee deegaankaaga\)](#)
2. soo qaado dhammaan [documents you need \(dokumentiyada aad u baahan tahay\)](#)
3. buuxi foomka oo toos adigu u gee [your local Service Ontario OHIP Office \(Xafiiska OHIP Ontario ee adeegga ee deegaankaaga\)](#)

Waad dalban kartaa isla markii aad hesho dokumentiyada aad u baahan tahay. Hase yeeshee, heli maysid Kaadh Caafimaad ilaa aad mutaysato – 3-month waiting period (kadib muddada 3-da bilood ah).

Qaxootiga la deegaameeyey iyo dadka kale ee loo deegaameeyey arrimo binu-aadamnimo waxay mutaystaan daboolka OHIP isla marka ay soo galaan Ontario. Dacwoodayaasha qaxootiga, dadka la dhawray, dhibbanayaasha ka-ganacsiga aadanaha iyo dad kale oo cayiman kuwaasi oo aan mutaysan OHIP waxay helaan dheefaha daryeelka caafimaadka aasaasiga ah oo xaddidan ee hoos taga [Interim Federal Health Program \(IFH\) \(Barnamijka Caafimaadka Federaalka ee Kumeel Gaadhka ah\)](#).

Wax badan ka ogow:

- [how to apply for an Ontario health card \(sida loo dalbato kaadhka caafimaadka Ontario\)](#)
- [what services are covered by OHIP \(adeegyada ay daboosho OHIP\)](#)
- [how to find a family doctor or nurse practitioner \(sida loo helo dhakhtarka qoys ama kaaliye caafimaad\)](#)
- [Mental Health Helpline \(Taleefanka Caawimada Caafimaadka Maskaxda\)](#)
- [buying private health insurance for immigrants, newcomers and visitors \(iibsashada caymiska caafimaadka gaarka ah ee muhaajiriinta, soo-galootiga iyo booqdayaasha\)](#)
- [Health benefits under the Interim Federal Health Program \(Dheefaha caafimaadka ee hoos taga Barnamijka Caafimaadka Federaalka ee Kumeel Gaadhka ah\) -
<https://www.canada.ca/en/immigration-refugees-citizenship/services/refugees/help-within-canada/health-care/interim-federal-health-program/services.html>](#)

Haddii aanad lahayn kaadhka OHIP

Haddii aanad lahayn caymis gaar ah laakiin u baahan tahay inaad dhakhtar la kulanto kahor muddada saddexda bilood ee sugitaanka:

- wac 911 haddii ay xaalad gurmada ah tahay
- xaaladaha aan gurmada ahayn, la xidhiidh:
 - Telehealth [1-866-797-0000](tel:1-866-797-0000) si aad ugu hesho talo caafimaad oo bilaash ah taleefanka
 - [local Community Health Centre \(Xarunta Caafimaadka Bulshada deegaankaaga\)](#), waxa laga yaabaa inaad ka hesho adeegyo caafimaad
 - [a settlement agency \(hay'ad deegaamayneed\)](#) bulshadaada dhexdeeda oo kaa caawin karta inaad hesho adeegyo caafimaad
 - [apply for Interim Federal Health Program coverage \(dalbo caymiska Barnamijka Caafimaadka Federaalka ee Kumeel Gaadhka ah\)](#) haddii aad tahay dacwoode qaxtooti ama dhibbane ka-ganacsiga aadanaha- <https://www.canada.ca/en/immigration-refugees-citizenship/services/refugees/help-within-canada/health-care/interim-federal-health-program/apply.html>
 - booqo rug caafimaad oo bilaa ballan la aado oo toos isaga bixiso kharashka adeegyada (laguu celin maayo lacagta aad ku bixiso adeegyadan)

Hel shatiga kaxaynta baabuurka

Haddii hore u haysatay shatiga kaxaynta baabuurka oo shaqaynaya ee gobol ama waddan kale, waxaad isticmaali kartaa shatigaas 60 maalmood. Kadib 60 maalmood, waxaad u baahan tahay inaad ku beddesho shatiga kaxaynta baabuurka ee Ontario.

[Apply to exchange an out-of-province licence \(Dalbo inaad beddesho shatiga kaxaynta baabuurka oo gobolka ka baxsan\).](#)

Haddii aanad haysan shatiga kaxaynta baabuurka oo shaqaynaya laakiin aad rabto inaad baabuur ku kaxayso gobolka waa inaad ugu yaraan tahay 16 jir oo aad haysato shatiga kaxaynta baabuurka ee Ontario. Markaad gudubto tijaabada indhaha iyo imtixaan qoraal ah oo kusaabsan xeerarka waddooyinka, waxaad dalban kartaa:

- shatiga darajada G, haddii aad rabto inaad kaxayso baabuur yar, baabuur qafilan iyo/ama baabuurta xammuulka ee yaryar
- shatiga darajada M, haddii aad rabto inaad kaxayso mooto, iskuutar (nooc mootada ka mid ah) iyo/ama (mootada yaryar)

[Get a G driver's licence for new drivers \(Hel shatiga dirawalka G ee dirawalada cusub\).](#)

Wax badan ka ogow:

- [getting a motorcycle licence \(helista shatiga mootada\)](#)
 - [the Driver's Handbook, the guide to help you study for your written test \(Buug-gacmeedka Dirawalka, hagaha kaa caawinaya inaad darista imtixaanka qorista\)](#)
 - [what happens if you are convicted of breaking driving laws \(ka waran haddii lagugu helo inaad jabisay sharciga wadista\)](#)
-

Gaadiidka

Gaadiidka dadwaynaha

Gaadiidka dadwaynaha waa laga helaa magaalooyinka iyo gobolada intooda badan gobolka oo dhan. Waxaad ka dooran kartaa:

- basaska deegaanka ama gobolka
- adeegyada gaadiidka ee dadka naafada ah
- tareenada
- basaska
- basaska adeegga gaarka ah leh
- gaadiidka rakaabka ee korontada ku shaqeeya iyo/ama tareenada dhulka hoos mara (Toronto)

Waa inaad iska bixiso kharashka gaadiidka dadwaynaha gobolka inta badan. Qiimaha nooligu wuu kala duwanaa karaa iyadoo ku xidhan da'daada, goobta iyo meeshu intay jirto.

Wax badan ka ogow:

- [transportation for seniors and people with short and long-term disabilities \(gaadiidka waayeelka iyo dadka leh naafada muddada gaaban iyo muddada fog\)](#)
- [public transit in your city/region \(gaadiidka dadwaynaha magaalada/gobolkaaga\)](#)
- [GO Transit trains and buses \(tareenada iyo basaska GO Transit\)](#)
- [VIA rail trains and schedules \(Tareenada VIA iyo jadwallada\)](#)

Gaadiidka dugsiga

[Contact your local school board \(La xidhiidh guddida dugsiga deegaankaaga\)](#) haddii aad u baahan tahay inaad qabanqaabiso gaadiid taga iyo mid ka imanaya dugsiga carruurtaada.

Cidda la wacayo muddada xaaladda gurmada

Haddii tani tahay xaalad gurmada ah, wac 911.

Ontario waxay leedahay nidaam isku-diyaarin xaaladda gurmada ah oo u diyaarsan inuu dadka u sheego:

- duufaanada jiilaalka
- duufaanada roobka
- dabka kaymaha
- tornaadada
- fatahaadaha
- kulka daran
- xaaladaha gurmada ee niyuukleerka
- cudurrada dillaaca
- dhulgariirada

[Sign up for email and text alerts \(Isku diiwaangali helitaanka digniinaha iimeylka iyo farriimaha taleefanka\)](#) xaaladda gurmada.

Wax badan ka ogow [how to prepare for an emergency \(sida la isugu diyaariyo xaalad gurmada ah\)](#).